

# WAKHTIGA KA HOR DUGSIGA XANAANADA CARRUURTA

U gudbida Dugsiga Xanaanada Carruurta ee Qoysaska Luuqadaha badan ku hadla iyo kuwa Caalamiga ah



Ilmahaagu waxa uu bilaabayaa safar cusub oo waxbarasho rasmi ah. Marka carruurta ay aadan dugsiga xanaanada carruurta, qoysasku wey ku adkaan kartaa iney isbeddelka cusub la qabsadaan. Dugsiyada Dadweynaha ee Degmada Jefferson (JCPS) waxay leeyihiin [agabyo](#) lagu caawiyo qoysaska caalamiga ah iyo kuwa ku hadla luuqadaha badan marka ay bilaabayaan dugsiga xanaanada carruurta.

Waxaad codsan kartaa turjumaan markaad la hadlayso shaqaalaha JCPS.

Waxaad isticmaali kartaa [Kaarka Waan Hadlayaa](#) si aad u caawiso. Qaado kaarka oo tus shaqaalaha dugsiga. Waxaad daabacan kartaa kaarka warqada ama waxaad ku sawiri kartaa kameerada telefoonkaaga.



Markaad codsato turjumaan, shaqaalaha dugsigu waxay turjumaanka kula xiriiri doonaan telefoon ama ablikeeshan. Waxaad u baahan doontaa inaad sugto inta shaqaaluhu ka helayaan adeegyada luqadda.

## Barnaamijyada

- Haddii qoyskaagu ay ku hadlaan afaf kale marka ay guriga joogan, ilmahaagu waxa laga yaabaa inuu u qalmo Adeegyada Barashada Ingiriiska. Waxaad codsan kartaa adeegan ilaa lix bilood ka hor inta aysan bilaabmin fasallada dugsiga xanaanada carruurta. Ka wac waaxda [Ingiriiska oo ah Luuqadda Labaad](#) (ESL) 502-485-3623 si aad u hesho caawimaad.
- Cunugaagu wuxuu ku biri karaa Kooxda Ready4K. Barnaamijkan xagaaga ee JCPS wuxuu ka caawiyaa qoysaska iyo carruurta inay u diyaar garoobaan u gudbida dugsiga xanaanada carruurta. Carruurta waxay baran karaan xirfado cusub, la falgalaayan carruurta kale, oo waxay isku dayi karaan hawlaha cadiga ah ee dugsiga. Diiwaangelintu waxa la furi doona horraanta gu'ga. Si aad wax badan uga ogaato, wac (502) 313-4357 ama iimayl ku dir <mailto:jcps.help@jefferson.kyschools.us>.

## Shuruudaha Caafimaadka

Gobolka Kentucky wuxuu leeyahay [shuruudo caafimaad](#) oo loogu talagalay carruurta bilaabaysa dugsiga. Ilmahaagu waxa uu u baahan doonaa baaritaano jireed iyo tallaalo. Booqo [Xarumaha Caafimaadka Qoyska](#) si aad ugu hesho bixiyeyaasha, adeegyada, iyo macluumaadka luuqadda aad door bidayso.



## Shuruudaha Diiwaangelinta

Si aad isaga diiwaan geliso dugsiga, waa inaad keentaa waraabo muujinaya inaad ilmuhu mas'uul ka tahay iyo inaad aaga deegan tahay.

**Qoysasku way diwaangelin karaan carruurtooda iyadoon loo eegayn xaaladooda haddii ay soogalooti yihiin.**

Nooca Dukumentiga	Dukumeentiga la aqbali karo
Caddeynta Dhalashada Ilmaha	Shahaadada dhalashada, baasaboorka, ama <a href="#">foomka I-94</a>
Caddaynta Ciwaanka Qoyska	Kiro ama <a href="#">lacagaha billaha ah ee adeegyada lagu qabtay bishaas</a> kuwooda ugu dambeeyay
Aqoonsiga Waalidka ama qofka Mas'uulka ka ah	<a href="#">Shatiga darawalnimada</a> ama kaarka aqoonsiga qunsuliyada ee Mareykanka ama waddan hore

- Haddii aadan haysan dhammaan dukumeentiyada, JCPS wali way diiwaangelinaysaa ardaygaaga. Waxaad u baahan doontaa inaad keento dukumeentigaaga sida ugu dhakhsaha badan.
- Haddi qof weyn uusan sharciyan awood uu lahayn in uu caruurta xanaaneeyo, waxay isticmaali karaan foomka awooda qareenka ama dhaarta daryeelaha.
- Carruurtaada dugsiga waad ka diwaangelin kartaa xataa haddii aadan lahayn degaan go'an oo joogto ah. Ka wac Xafiiska Helitaanka iyo Fursadaha ee JCPS (502) 485-3650 si aad uu hesho caawimaad.